U DIYAARGAROWGA XAALADAHA DEGDEGGA AH EE QOYSKA IYO BULSHADA

Hagaha Ka-Qeybqaataha

Copyright © 2024
Isbahaysiga Midwest ee loogu talogalay Tababarka Shaqaalaha Qashinka Halista ah

Mahadnaqooyinka

Manhajkan waxaa diyaariyay Isbahaysiga Midwest ee loogu talogalay Tababarka Shaqaalaha Qashinka Halista ah iyadoo lagu fulinayo heshiis iskaashi oo lambarkiisu yahay U45 ES 06184 kaasoo laga helay Hay'adda Qaranka ee Sayniska Caafimaadka Deegaanka. Shaqaalaha ka socda Fisk University ayaa hogaamiyay horumarinta barnaamijkan, iyadoo dib-u-eegis lagu sameeyay oo ay ka qeyb qaateen xubno kale oo ka tirsan Isbahaysiga Midwest.

Waxaan kugu dhiirrigelinaynaa inaad ka faallootid agabyadan. Fadlan u gudbi talooyinkaaga dadka hogaaminaya barnaamijka aad hadda ka qeybgaleyso.

Digniin

Qalabkan waxaa xuquuqdiisa daabacaadda iska leh Isbahaysiga Midwest ee loogu talogalay Tababarka Shaqaalaha Qashinka Halista ah. Qof kasta oo aan ahayn Dowladda Federaalka oo heysta agabkan ma awoodo inuu dib u daabaco agabkaas iyada oo aan oggolaansho laga haysan mulkiilaha xuquuqda daabacaadda.

Agabka waxaa loo diyaariyey in ay isticmaalaan macallimiin khibrad leh si ay ugu adeegsadan tababarka u diyaargarowga xaaladaha degdegga ah ee qoyska iyo bulshada. Qorayaasha agabkan waxay u diyaariyeen in loo adeegsado waxbarid laga bilaabo taariikhda hoos lagu xusay. Isticmaaleyaasha waxaa lagu wargelinayaa in mawduuca uu si joogto ah isu beddelayo. Sidaa darteed, agabka waxaa laga yaabaa in uu u baahdo wax ku darmooyin, ka tuurisyo, ama wax ka beddelaadyo si loo waafajiyo isbeddelada dhacaya taariikhda diyaarinta agabkan kadib.

Dhammaan xiriiriyeyaasha websaydhka way shaqaynayeen laga bilaabo Juun 3, 2024; haddii aad khalad aragto, fadlan la socodsii macallinka si loo cusboonaysiiyo.

Afeef

Maadaama barnaamijkan uu wax ku barayo ka qaybgalayaasha wax ku saabsan u diyaargrowga xaaladaha degdegga ah ee khataraha ka dhici kara aagga ay ku nool yihiin, haddana ma bixiyo tababar ku filan oo ku saabsan xirfadaha jawaab-celinta degdegga ah sida gargaarka degdegga ah, hawlgallada caafimaadka ee masiibada, ama raadinta fudin iyo badbaadinta fudud taas oo ka dhigaysa ka qaybgalayaasha inay u qalmaan inay ku biiraan Kooxda Jawaab-celinta Degdegga ah ee Bulshada (CERT). Macluumaadka ku saabsan tababarka dheeraadka ah ee laga yaabo in loo baahdo, fadlan la tasho fududeeyaha tababarka.

Jadwalka Nuxurada

Horudhac	1
Garo Khataraha	3
Diyaargarowga Qoyska	6
Diyaargarowga Bulshada	12
Inta Lagu Jiro Xaalada Degdegga ah	14
Xaalada Degdegga ah kadib	20
Xerida	23
Dheeraadka	24
Xaashiyaha Shaqada	25
Jadwalka Taariikhda Liiska Saadka Degdegga	29
Illaha Internetka	30

HURUDHAC

Waxaad halkan u joogtaa sababtoo ah waxaad ka walaacsan tahay u diyaargarowga xaaladaha degdegga ah ee qoyska iyo/ama bulshada. Xudunta diyaargarowga qoyska waa "**waxaa tahay caawimaada illaa caawimaada ay ka imaanayso**". Xudunta diyaargarowga bulshada waa **"deris caawinaya deris"**

Yoolalka Wax barashada

Ka dib barnaamijkan, waxaad si wanaagsan uga awoodi doontaa in aad:

- Aqoonsato khataraha ugu badan ee saameyn kara bulshadaada.
- Qeexdo waxa aad sameyn lahayd ka hor, inta lagu guda jiro, iyo ka dib masiibada dabiiciga ah.
- Sharaxdo muhiimada qorsheynta adkeysiga deriska iyo bulshada.

Maxaa loo Sameynaa Diyaargarowga Qoyska?

Scenario: Flat tire

Stressed, stranded, waiting for help

OR

EMPOWERED with ability to self-assist

Maxaa loo Sameynaa Diyaargarowga Bulshada?

Scenario: Dead car battery

Equipped but in need of a helping hand

OR

UNITY...Neighbor helping Neighbor

GARO KHATARAHA

Ujeedooyin

Ka dib dhammeystirka qeybtaan, waa inaad awood u yeelataa inaad:

- Qeexdo noocyada khataraha
- Aqoonsato khataraha ugu suurtagalka badan ee bulshadaada

Khataraha dabiiciga ee halista ah waxaa ka mid ah fatahaadaha, duufaannada, dabeylaha, onkod, duufaannada jiilaalka, kuleyl ama qabow daran, dabka kaymaha, dhulgariirrada, foolkaannada, dhul hoobad, iyo hirarka sunamiga.

Khataraha waxyaabaha Halista ah waxaa ka mid ah sii-deynta shil ahaan uga timaadda shilalka gaadiidka, xarumaha warshadaha wax soo saarka, xarumaha tamarta nukliyeerka, iyo isticmaalka khaldan ee alaabada kiimikada ee guryaha lagu isticmaalo.

Courtesy Fairfax Fire and Rescue

Khataraha Argagixisadu waxay ka mid yihiin weerarro si ula kac ah loo fuliyo oo ay ka mid yihiin khataro kiimiko/bayooloji/raadiyooloji (shucaac) sida qaraxyada, sii daynta walxaha kiimikada, adeegsiga cudurro loo beddelay hub, iyo sidoo kale weerarro kombiyuutar ku saleysan oo dhanka internetka ah.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan khataraha kala duwan waxaa laga heli karaa Qeybta Dheeraadka.

Hawsha: Garo khataraha

Ka shaqeeya kooxdaada yar si aad u dhammaystirtaan hawl uu macallinku bixiyey si aad u aqoonsataan khataraha ugu waaweyn ee deegaankaaga ka jira.

DIYAARGAROWGA QOYSKA

Xudunta diyaargarowga qoyska waa "**waxaa tahay caawimaada illaa caawimaada ay ka imaanayso**".

Ujeedooyin

Ka dib dhammeystirka qeybtaan, waa inaad awood u yeelataa inaad:

- Qeexdo Qorshaha Isgaarsiinta Qoyska
- Sharaxdo Qorshaha Masiibooyinka ee Qoyska
- Sharaxdo Qalabka Gurmadka Degdegga ah

Diyaargarowga Qoyska

WAXAY U FUDUDAHAY SIDA

1) Samee **Qorshaha Isgaarsiinta Qoyska**

2) Samee **Qorshaha Musiibada Qoyska**

3) Hel **Xirmada Xaaladaha Degdegga ah**

Qorshaha Isgaarsiinta Qoyska

Ka caawi qoyskaaga diyaarinta qorshe isgaarsiin.

1. **Uruuri** macluumaadka
2. **La wadaag** macluumaadka
3. **Tababar qaata**

Foomam la buuxin karo ayaa laga heli karaa halkan: https://www.ready.gov/kids/make-a-plan

Qorshaha Musiibada Qoyska

Ka fikir guryahaaga. Maxaa noqon kara meelaha amniga ah ee gudaha guriga haddii masiibo dhacdo? Sidee ayaad isaga baxsan kartaa haddii loo baahdo? Halkee ayaad ku kulmi kartaan dibadda guriga?

- Meelaha Amniga ah ee Guriga Gudihiisa iyadoo loo eegayo Nooca Khataraha:
- Wadooyinka Baxsashada ee ugu wanaagsan
- Goobo Badan oo lagu Kulmo (Ka Baxsan Guriga)
- Ha ilaawin Xayawaanada Rabaayadaha iyo Dadka Qaba Baahiyaha Gaarka ah

Disability/Special Need	Additional Steps
Hearing impaired	May need to make special arrangements to receive warnings.
Mobility impaired	May need special assistance to get to a shelter.
Single working parent	May need help to plan for disasters and emergencies.
Non-English speaking persons	May need assistance planning for and responding to emergencies. Community and cultural groups may be able to help keep people informed.
People without vehicles	May need to make arrangements for transportation.
People with special dietary needs	Should take special precautions to have an adequate emergency food supply.

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa halkan: https://www.ready.gov/plan

Hawsha: Qorshaha Musiibada Qoyska

Hadda waxaad haysataa waqti aad ku bilowdo horumarinta qorshaha musiibada qoyska ee degdegga ah ee macallinkaagu bixiyo.

Hawlaha Guriga: Waxbar Carruurta

Ku Imtixaan Carruurta Qorshayaasha: Ka dhig Ciyaar!

Ku dar howlaha Sida iyo Goorta la Waco 9-1-1

Xirmada Xaalada Degdegga ah

Photo:Ready.gov/kit

Waxaa jira xirmooyinka diyaar garowga xaaladaha degdegga ah oo badan oo laga heli karo dukaamada iyo onleenka. Sidoo kale, waxaad si tartiib ah isugu keeni kartaa naftaada xirmada.

- **Biyo** (hal gallon qofkiiba maalintii ugu yaraan saddex maalmood, oo loo isticmalayo cabitaan iyo nadaafad labaduba)
- **Cunto** (ugu yaraan sahay saddex maalmood oo cunto aan hallownin ah)
- **Dawooyinka dhakhtarka uu qoro**
- **Lacag caddaan ah**
- **Raadiye** ku shaqeeya batari ama gacanta lagu rogi karo iyo NOAA Weather Radio oo wata muusiga digniinta
- **Toosh**
- **Baytariyo dheeri ah**
- **Sanduuqa gargaarka degdegga ah**
- **Seeri/firimbi** lagu muujiyo in caawinaad aad dalbanayso
- **Maaskaraha boorka**, **xaashi balaastiig ah**, iyo **duub koolo ah** si hoy lagu dhex-noolaado loogu dhegto
- **Shukumaano qoyan**, **boorsooyinka qashinka**, and **xarig caag ah** oo loogu adeegsado nadaafada shakhsiga
- **Gasac furaha gacanta**
- **Khariidada deegaanka**
- **Telefoonka gacanta** oo wata jaajar iyo **baytari keyd ah**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kaydka waxaa laga heli karaa: https://www.ready.gov/kit

Jadwalka loogu talagalay isku uruurinta xirmada xaalada degdegga ah

waxaa lagu heli karaa Qeybta Dheeraadka.

DIYAARGAROWGA BULSHADA

Xudunta diyaargarowga bulshada waa **“deris caawinaya deris"**

Ujeedooyin

Ka dib dhammeystirka qeybtaan, waa inaad awood u yeelataa inaad:

- Aqoonsato xadidnaanta bulshadaada marka xaalad degdeg ah timaado.
- Aqoonsato tallaabooyinka ay bulshadaadu qaadi karto si ay ugu diyaar garowdo xaalada degdeg ah.
- Aqoonsato khataraha gaarka ku ah xaafadaada oo sameey qorshayaasha u diyaarsanaanta xaaladaha degdegga ee bulsho ahaan

Photo:https://www.cleveland.com/lakewood/2014/11/train_traffic_triples_though_l.html

Tusaale: Qorshaynta Bulshada ee Xaalada Degdegga Ka Hor



https://crowdsourcerescue.com/

Hawsha: Horumarinta Qorshaha Bulshada

Kooxdiina yar waxay hadda ka qaybqaadan doontaa hawl uu bixiyo fududeeyaha.

INTA LAGU JIRO XAALADA DEGDEGGA AH

Ujeedooyin

Ka dib dhammeystirka qeybtaan, waa inaad awood u yeelataa inaad:

- Aqoonsato sida loo sii wadi karo helitaanka macluumaad marka xaalad degdeg ah timaado.
- Sharaxdo, daadgureynta, hoyga gabaadka, iyo xayraada

Su'aalaha muhiimka ah ee laga weyn yahay inaad ogaato marka xaalad degdeg ah timaado:

- Waa maxay farqiga u dhexeeya feejignaan iyo digniin?
- Xagee ayey ku yaalaan hoyga xaalada degdegga ah ee bulshadeyda?
- Maxaa sameynayaa marka ay xayiraad jirto ama haddii laiigu dhoho gabaad gal?
- Maxaa sameyaa haddii uu jiro koronto la'aan oo aan haysto qalab caafimaad?
- Yaa ah maamulka deegaanka ee bixiya macluumaadka inta lagu jiro xaalada degdeg ah?

La Soco: Digniinada iyo Xaaladaha Degdega ah

Isgaarsiintu waa lama huraan si looga badbaado xaaladaha degdegga ah. Rikoorada cimilada, rikoorada wata baytariyada, taleefannada gacanta, iyo aalad kasta oo isgaarsiineed oo aan u baahnayn koronto ayaa ah iibsashada xirmooyinka xirmada ugu weyn.

<u>Digniin vs. Ogaal</u>

Digniinta: Shuruuduhu waa kuwo u roon ama la filayo inay dhacaan, balse weli ma dhicin ama si degdeg ah uma dhowa inay dhacaan

Ogaalka: Xaaladaha ayaa dhacaya ama soo dhowaanaya inay dhacaan

La Soco: Apps-yada Telefoonada Casriga, Facebook, Twitter

Gudaha ah

Saaxibada Wararka

Xafiiska Duqa Magaalada ee Maareynta Xaaladda Degdegga ah (OEM)

Gobolka

Hay'adda Maareynta Xaaladda Degdega ah ee Gobolka

Qaranka

Hay'adda Maareynta Xaaladaha Degdega ee Federalka (FEMA)

Adeegga Cimilada Qaranka

La Soco: Guuritaanka vs. Goobta Hoyga

Daadgureynta: Waa inaad u dhaqaaqdaa meel ammaan ah. Meelaha gaarka ah ee hoyga lama garanayo ilaa ay xaaladda degdegga uu ka dhacdo. Ururka Laanqayrta Cas ayaa leh goobo badan oo iskaa wax u qabso ah, laakiin waxay kuxirantahay baahiyo gaar ah iyo saadka xaaladaha degdegga ah ee shaqsiyeed, goobaha waxaa la doortaa waqtiga dhacdada.

Sawirka: https://emergency.cdc.gov/shelterassessment/

Joogista goobta: Raadi hoy degdeg ah oo ku har goobtaas inta lagu jiro xaaladda degdegga ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hoyga daryeelka bulshada iyo joogista goobta waxaa laga heli karaa halkan: https://www.ready.gov/shelter

La Soco: Tilmaamaha Guuritaanka

- Xirmada Xaalada Degdegga ah
- Qorshayaasha isgaarsiinada iyo musiibada
- Daawooyinka Lagama Maarmaanka ah iyo Nuqulada Dawooyinka loo Qoro
- Taleefanka Gacanta
- Rabaayadaha

Rabaayadaha had iyo jeer looma oggola qaar ka mid ah gabbaadyada xaaladaha degdegga ah, sidaa darteed horay u sii qorshey goob loogu talagalay oo rabaayadaha ku habboon. Gabaadyada qaarkood waxay oggolaan doonaan rabaayadaha haddii lagu hayo sanduuq.

Ku saabsan gurigaaga:

- Xir biyaha, korantada, iyo gaaska dabiiciga ah haddii saraakiisha ay kuu sheegaan
- Quful gurigaaga



Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daadgureynta waxaa laga heli karaa halkan:
https://www.ready.gov/evacuation

La Soco: Gabaad lagu hoydo vs. Mid Xiran



Sawirka Ciidama Cirka ee Mareykanka ee uu Qaaday David Perry

Xayiraada waxay ka adag tahay Joogista Goobta. Sug goobtaada oo ha ka bixin ilaa laguugu sheego inay ammaan tahay.

XAALADAHA DEGDEGGA AH KA DIB

Ujeedooyin

Ka dib dhammeystirka qeybtaan, waa inaad awood u yeelataa inaad:

- Weexdo tilmaamaha guud ee masiibada kadib.
- Aqoonsato illaha suurtagalka ah ee caawinta

Tilmaamaha Masiibada Kadib:

- Isku day inaad isdejiso oo aad u dhuglahaato macluumaadka/tilmaamaha
- Adeegso taleefanka oo keliya si aad u soo sheegto xaaladaha degdegga ah ee nafta halis gelinaya
- Ka soo qaado carruurtaada goob kulan oo hore loosoo go'aamiyay
- Ka fiiri deriska, gaar ahaan waayeelka iyo dadka baahiyaha gaarka qaba
- Ka dheerow meelaha burburay iyo khadadka tamarta ee daadsan
- Hubi tayada cuntada iyo biyaha inay xumaadeen.
- Ku calaamadee naftaada inaa badqab tahay Facebook-ga ama websaydhka Badqabka iyo Fiyoobaanta

- Raadi hay'adaha taageerada haddii loo baahdo!!!!



https://www.redcross.org/get-help/disaster-relief-and-recovery-services/contact-and-locate-loved-ones.html

Hay'adaha Taageerada

- FEMA
- Laanqayrta Cas
- Ciidanka Badbaadada
- Kaniisadaha/Hay'adaha ku Saleysan Iimaanka

- Hay'adaha Bulshada ee Mutadhawaciinta

Caafimaadka Dhimirka: Duufaan ka Duufaan

- Maxaa “caadi ah” musiibada kadib? Dib-u-dhiska waxay socon kartaa dhowr bilood iyo xitaa sanado

- Calaamadaha caafimaadka dhimirka musiibooyinka ka dib waxaa ka mid ah walwal guud iyo cabsi aan la aqoon

- Dhibaatooyinka Walaaca ee ka Dambeeya (PTSD) sidoo kale waa walaac oo waxaa ka mid noqon kara qarowga, dib-u-dhaca, weerarada walaaca, xanaaqa, ka fogaanshaha, iyo isticmaalka maandooriyaha

Shucuubta Inta Badan Halista Ugu Jirta:

- Carruurta iyo dhalinyarada
- Dadka waaweyn ee haysta carruur yaryar
- Waayeelada iyo naafada
- Kooxaha dakhligoodu hooseeyo
- Dadka qaba taariikhdii hore ee dhibaatada
- Jawaabayaasha koowaad iyo shaqaalaha badbaadada

GEBAGEBEYNTA

Waad mahadsan tahay ka qeybqaadashadaada barnaamijkan. Hadda waa inaad si fiican u awoodaa inaad:

- Aqoonsato khataraha ugu badan ee saameyn kara bulshadaada.
- Qeexdo waxa aad sameyn lahayd ka hor, inta lagu guda jiro, iyo ka dib masiibada dabiiciga ah.
- Sharaxdo muhiimada qorsheynta adkeysiga deriska iyo bulshada.

Tani waa fursad aad ku waydiin karto su'aalo kasta oo aad qabto, ama aad kaga doodi karto sida aqoonta iyo xirfadaha aad baratay loogu adeegsan karo shaqada.

Ugu dambeyn, waxaan kaa codsaneynaa inaad qaadato 10 daqiiqo si aad u buuxiso foomamka qiimeynta barnaamijka. Kuwani waa kuwo muhiim u ah horumarinta barnaamijka. Isbahaysiga Midwest waxay si dhab ah u qaadataa faallooyinkaaga waxayna isbedello ku sameysay nuxurka iyo jimicsiyada xirfadaha iyadoo ku saleysan jawaab celinta. Faallooyinkaaga waa qarsoodi.

Waxaan rajeyneynaa inaan kugu aragno barnaamij kale oo Midwest Consortium ah mustaqbalka.

Dheeraadka

Warqadaha Hawsha

- Garo khataraha
- Horumarinta Qorshaha Musiibada Qoyska
- Warqadda Hawsha Qorshaha Bulshada iyo Xaanshida

Jadwalka Taariikhda Liiska Sahay Siinta Xaalada Degdegga ah

Khayraadka Internetka

Hawlgalka #1 Xaashida Shaqada

Garo Khataraha: Maxa u maleysay inay yihiin khataraha ugu waaweyn ee ka jira meesha aad ku nooshahay?

TILMAAMAHA: Idinkoo koox yar ah qaata qiyaastii 10 daqiiqo si aad ugu buuxisaan jadwalka hoose ee laba ka mid ah xaaladaha degdegga ah ee ku habboon degmadaada. Sharax khatar kasta sida inay yihiin SARRE, DHEXDHEEXAAD ama HOOS. U diyaargarow inaad soo bandhigto adiga natiijooyinkaaga kooxda weyn.

Dhacdo	MACQUULAH (Ugu badnaan tani wey dhici doontaa)	SAAMEYNTA BINI'AADAMKA (Macquulnimada dhimashada ama dhaawaca)	SAAMEYNTA HANTIDA (Khasaarahaa jireed iyo waxyeellooyinka)	SAAMEYNTA GANACSI (Joojinta adeegyada)	DIYAAR-GAROWGA (Sii Qorsheynta Hore)	KHATAR GUUD (Khatarta Isbarbar dhigga)
Dabeylo						
Onkod daran						
Daad						
Guuldarada IT-ga/Khataraha internetka						
Koronto la'aan soo jiitameysay muddo dheer						
Roob baraf wata						
Xanuun faafa						
Dabka Dabiicigaah						
Dhulgariir						
Wax kale _____						

Hawlgalka #2 Xaashida Shaqada

Horumarinta Qorshaha Musiibada Qoyska

U Diyaar-garowga Duufaanta

Ka Hor Duufaanta

1.

2.

3.

4.

5.

Inta lagu jiro Duufaanta

1.

2.

3.

4.

5.

Ka dib Duufaanta

1.

2.

3.

4.

5.

Tixraaca: https://www.ready.gov/tornadoes (Macluumaadka U Diyaar-garowga Duufaanta)

Hawsha #3

Warqadda Hawsha Horumarinta Qorshaha Bulshada

TILMAAMAHA: Iskula shaqeeya koox yar si aad u buuxisaan waxyaabaha lagu calaamadeeyay **asterisk** (*) si aad u bilowdo horumarinta Qorshaha Diyaar-garowga/Adkeysiga Bulshadaada. Isticmaal warqadan qorshaha ee ku lifaaqan si aad u diiwaangeliso qaybaha muhiimka ah.

I. Samee koox qorsheynta wada-shaqeyn bulshada ah.

(a) Ka dhex dooro hogaamiyeyaal
(b) Ka dhex dooro xubnaha kooxda
(c) Ka dhex dooro daneeyayaasha muhiimka ah (Yaase noqon doona midka loogu saameynta badan yahay? Yaa leh dano badan oo ku saabsan daryeelka bulshada? Yaa leh aqoonta ugu badan ee taariikhda bulshada?

II. Fahmitaanka xaaladda bulshadaada

(a) *Samee isbeddelada cimilada, saadaasha, iyo khataraha
(b) *Aqoonso hantida muhiimka ah iyo khataraha (Maxaad dooneysaa inaad ilaaliso?)
(c) Waa maxay xiriirada bulshada ee jira ee ay tahay in la tixgeliyo marka la qorsheynayo?
(d) Waa maxay arrimaha muhiimka ah ee deegaanka dhismaha ee bulshada ee ay tahay in la qeexo oo la xaliyo?

III. Go'aami Yoolalka iyo Ujeeddooyinka Qorshaha

(a) *Qeex khataraha bulshada oo faahfaahi khatarta
(b) *Aqoonso kheyraadka bulshada.
(c) Aqoonso ama samee yoolalka bulshada ee muddada-dheer.
(d) Aqoonso ama samee yoolalka bulshada ee muddada-gaaban.

IV. Horumarinta Qorshaha

(a) * Ka fikira xalalka suurtagalka ah ee yareyn kara khataraha
(b) *Qiimee xalalka suurtagalka ah
(c) *Horumari istaraatiijiyadda fulinta (Yaa sameyn doona waxa, goorma, iyo sida?) Kheyraadkee ayaa loo baahan yahay? Waa maxay jadwalka waqtiga?
(e) Hel jawaab-celin iyo oggolaansho
(f) Dhameystir oo soo gabagabee qorshaha

V. Fulinta Qorshaha iyo Dayactirka

(a) Fulinta xalalka la oggolaaday
(b) Qiimee oo cusboonaysii
(c) Beddel istaraatiijiyadda sida loo baahan yahay

Warqadda Horumarinta Qorshaha Bulshada

Qaybaha Qorshaha			**Caqabadaha la filayo oo wajah mid kasta**	**Taariikh ay tahay in la dhammaysti ro**	**Sababta Daahitaanka**	**Taariikhd a la qabtay**
1.Isugu wac kulan	**Yaa isugu wacaayo?**	**Yaa kasoo qeybgalaayo?**				
2.Hel taageero	Iskaa wax u qabsadayaal Lacag Hor jooge					
3. Gebagebey qorshaha shaqada oo dejiso waqtiyada kama dambeysta ah ee ficil kasta	**Tallaabooyinka iyo waqtiyada kama dambeysta ah**	**Ayaa “leh” ficil kasta**				
4.Ku wargeli natiijada kama dambeysta ah asxaabta kooxda						
5.Ku wargeli natiijooyinka dadka deegaanka ee bulshada						

JADWALKA TAARIIKHDA EE LIISKA BIXINTA XAALADA DEGDEGGA AH

Isku ururinta xirmada u diyaargarowga ee xaaladaha degdegga ah iyo abuurista qorshe isgaarsiin qoys ayaa laga yaabaa inay umuuqato wax xad dhaaf ah, laakiin waad fududayn kartaa inaad u kala jejebiso howlaha tillaabooyin yaryar. U adeegso jadwalkaan taariikhda si aad u hubiso sahaydaada oo aad ku buuxiso liiskaaga toddobaadlaha "Aad Qaban Doonto" Waxaad u baahan tahay inaad yeelato waxyaabo aan burbureyn adiga iyo qoyskaagaba si aad u badbaadaan ilaa 72 saacadood. La ekeysi iibsigaaga adiga oo u eegaaya tirada qoyska.

Isbuuca 1	Isbuuca 2	Isbuuca 3	Isbuuca 4	Isbuuca 5	Isbuuca 6
Gadasho • 1 qurjac oo biyo ah • 1 gasac oo khudaar ah • Calaamadeeyaha joogtada ah • Koolo • Gasac furaha gacanta	**"La Qaban Doono"** **Qorsheynta Qoyska** • Qoyskaaga u sameeyso qorshe degdeg ah oo looga hortagoDuufaanta Tornado **Qorsheynta Bulshada** • Aqoonso deris, qof qaraabo ah, ama saaxiib oo u baahan kara caawimaad inta lagu jiro xaalad degdeg ah	**Gadasho** • 1 gasac oo miro ah • Toosh • Baytariyo dheeri ah • Seeri/Firimbi • Tirtire qoyan	**"La Qaban Doono"** **Qorsheynta Qoyska** • Hel wixii dawooyin dheeraad ah oo ku calaamadee "Loo Isticmaalo Xaaladda Degdegga ah" **Qorsheynta Bulshada** • Soo ogow inaad leedahay hay'ad nabadgelyo xaafadeed oo aad ku biirto	**Gadasho** • 1 qurjac oo biyo ah • 1 gasac oo borotiin ah • Sanduuqa gargaarka degdegga ah • maaskaraha boorka • Bacaha saqafka	**"La Qaban Doono"** **Qorsheynta Qoyska** • Meel dhig lacag yar oo kaash ah **Qorsheynta Bulshada** • Kusoo biir nidaam kasta oo heeganka xaalada degdegga ah oo loo maro taleefanka gacanta ama warbaahinta bulshada

Isbuuca 7	Isbuuca 8	Isbuuca 9	Isbuuca 10	Isbuuca 11	Isbuuca 12
Gadasho • 1 qurjac oo biyo ah • 1 kartoon oo cabitaanka tamarta ah • Bacaha qashinka • Tayga caaga ah • Shumacyada/taraqyada ku jira weelka ka hortagga biyaha	**"La Qaban Doono"** **Qorsheynta Qoyska** • Samee nuqul ka mid ah waraaqaha muhiimka ah oo ku rid bacaha ka-hortagga biyaha **Qorsheynta Bulshada** • Samee xiriir ka baxsan magaalada si aad ugu wacdid haddii ay jirto xaalad degdeg ah	**Gadasho** • 1 gasac oo khudaar ah • 1 gasac oo miro ah • 1 gasac oo borotiin ah • Raadiye batari ku shaqeeya ama gacanta ku shaqeeya oo leh Hawo Qaadaha Gacanka NOAA	**"La Qaban Doono"** **Qorsheynta Qoyska** • Samey liis alaabo gaar ah oo u baahan yahay ilmaha, rabaayaddaha, xayiraadaha cuntada **Qorsheynta Bulshada** • Aqoonso wadooyinka daadguraynta iyo adeegyada gaadiidka ee xaaladaha degdegga ah	**Gadasho** • Alaabada Gaarka ah • Sahayda nadaafadda ee dheeraadka ah • Qalabka Roobka • Galoofyada shaqada • Kashabiito iyo biinso	**"La Qaban Doono"** **Qorsheynta Qoyska** • Hubso in carruurtu yaqaanaan sida iyo goorta la wacayo 911 **Qorsheynta Bulshada** • Soo ogow qorshayaasha u diyaarsanaanta degdegga ah ee goobtaada shaqada

KHEYRAADKA INTERNETKA

Saamaynada ay ku yeelato Isbedelka Cimilada ee Caafimaadka Aadanaha
https://apha.org/topics-and-issues/climate-change/health-impacts

Samee Qorshe: Liiska hubinta
https://www.ready.gov/make-a-plan

Dhiso Xirmo Macluumaad ah
https://www.ready.gov/build-a-kit

Ilaalinta Naftaada Inta Lagu Jiro Nadiifinta Kadib Duufaanta Dabaylaha Xooggan
https://mwc.umn.edu

Dabeelada Tornado
https://www.ready.gov/tornadoes
Xaashida Xaqiiqada: https://www.ready.gov/sites/default/files/2020-03/tornado-information-sheet.pdf

Kasoo Kabashada Musiibada ama Dhacdada Naxdin leh
https://emergency.cdc.gov/coping/index.asp

Qorshaha Isgaarsiinta Degdega ah
https://www.ready.gov/kids/make-a-plan

Tagitaanka korantada
Xaashida Xaqiiqada: https://www.ready.gov/sites/default/files/2020-03/power-outage_information-sheet.pdf

Daadad
https://www.ready.gov/floods
https://www.epa.gov/sites/production/files/2014-07/documents/flood-resilience-checklist.pdf
Xaashida Xaqiiqada: https://www.ready.gov/sites/default/files/2020-03/flood_information-sheet.pdf

Dhacdooyinka Waxyaabaha Halista ah
https://www.ready.gov/hazardous-materials-incident

Xayawaanada rabaayadaha https://www.ready.gov/pets